

SOMALIA

XAQIIQOYINKA IYO TIROOYINKA

JANAAYO - DISEMBAR 2023



ILAALINTA DADKA RAYIDKA AH

- **93** qof ayaa ICRC la wadaagay welwelkooda ku aadan cawaaqibka ka dhalan kara colaadaha hubaysan ee noloshooda, tan qoysaskooda ama habnololeedkooda.
- **131** qof ayaa helay kaalmo lacageed si looga caawiyo ka soo kabashada dhibaatooyinka ka dhasha colaadaha iyo rabshadaha halka **12** kalena loo diray hey'ado kale oo aan saaxiib nahay si ay u helaan adeegyada ay u baahanyihiin.
- Walaac ay soo gudbiyeen **62** qof ayaa lala soo qaaday kuwa hubka sita si loo raadiyo magdhow loogana hortagayo waxa mustaqbalka dhici kara.



ILAALINTA XIRIIRKA QOYSKA

- Iyada oo la kaashanayo Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS), **91,102** oo ah farriimaha Laanqayrta Cas ayaa la isdhaafsaday, iyo **161,537** oo ah wicitaano taleefan oo bilaash ah ayaa loo sameeyay qoysaska kala lumay.
- Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) ayaa soo heshay **541** qof oo la la'aa oo ay xubnaha qoysaskooda raadinayeen. Isugeyn, **26** xero qaxooti oo ku yaala Soomaaliya ayaa la siiyay adeegyada Ilaalinta Xiriirka Qoyska.
- **117** howlwadeen, oo ay ku jiraan dhaqaatiir, kuwa dhibaatooyinka ka jawaaba, iyo ciidamada qalabka sida ayaa lagu tababaray maareynta dadka dhintay, tababarka oo lagu qabtay Laas Caanood, Garoowe, iyo Burco.



KOR U QAADISTA SHARCIGA CAALAMIGA AH EE BINI'AADAMNIMADA (IHL)

- **605** oo ah xubno ka tirsan ciidamada ammaanka ayaa la baray sharciga caalamiga ah ee bini'aadamnimada iyo hagaajinta ilaalinta dadka rayidka ah. **39** xubnood oo ka tirsan booliska ayaa iyana la baray sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka (IHRL).
- **921** qof, ay ku jiraan shaqaale ka socda sadex isbitaal iyo sideed xarun caafimaad ayaa helay xog ku saabsan Daryeelka Caafimaadka oo Halis ku jira si loo dhiirgaliyo ixtiraamka shaqaalaha caafimaadka, xarumaha, iyo gaadiidka.
- **30** macalimiin iyo **560** arday ah ayaa looga warbixiyay ICRC-da iyo sharciga caalamiga ah ee bini'aadamnimada.



HAGAAJINTA XAALADAHA NOLOLEED IYO LA MACAAMILKA MAXAABIISTA

- ICRC-da ayaa **31** booqasho ku tagtay **15** xabsi si ay u qiimeeyso una hagaajiso xaaladaha nololeed iyo habka loola macaamilo **4,495** maxaabiis ah. **535** maxbuus ayaa la kormeeray lana booqday si gaar gaar ah.
- Isugeyn **4,960** maxaabiis ah oo ku jira **15** xabsi ayaa helay agabka nadaafadda sida saabuunta, jergaano iyo baaldiyaal. **40** farriimaha akhbaarta qoyska ah ayaa loo diray qoysaska maxaabiista iyada oo la adeegsanayo taleefan. **95** farriimo afka ah ayaa laga soo ururiyay maxaabiista iyada oo loo gudbiyay qoysaskooda. **13** Farriimaha Laanqayrta Cas ah ayey isdhaafsadeen maxaabiista iyo qoysaskooda. **35** Qof oo ajnabi ah ayaa lagu wargaliyay wakiillada qunsulkooda ama UNHCR.
- Inta lagu jiray bisha Ramadaan, **5,389** maxaabiis ah oo ku jira **12** xabsi ayaa helay saliid, misir, caano, timir, sokor, yaanyo shiishiid, iyo hilib ari si ay ugu dhammeystiraan afurkooda.
- **4,140** maxbuus ayaa ka faa'iideystay dayactirka iyo hagaajinta dhismayaasha ee **6**-da xabsi dhexe ee Mandheera, Hargeysa, Kismaayo, Garoowe, Baydhabo iyo Muqdisho.
- **176** oo ah ka qeybgaleyaal ka kala socday Ciidanka Asluubta ee Somaliland iyo Puntland ayaa qaatay tababarro ku saabsan Xeerarka Mandela si looga caawiyo in ay si wanaagsan u gutaan howl-maalmeedkooda maareynta xabsiyada.
- **2,133** maxbuus ayaa la gaarsiiyay agabka shakhsiyadeed ee aasaasiga ah sida saliyaal, joodariyaal, maro-kaneeco iyo bustayaal.
- **169** maxaabiis ah oo qaba nafa xumo aad u daran iyo mid dhexdhexaad ah ayaa la taageeray **2** xabsi.
- Xarumo caafimaad oo ku yaala **6** xabsi ayaa lagu taageeray deeq isugu jirta dawooyinka asaasiga ah iyo agabka dhaawaca lagu dhayo. Qalabka caafimaadka aasaasiga ah ayaa waxaa ka faa'iideysan doona **3,650** maxbuus.
- ICRC waxay fududeysay in labadii maxbuus ee la sii daayay ay qoysaskooda dib ula midoobaan. Maxaabiista la siidaaya ayaa waxaa Laas Caanood ka qaaday oo Hargeysa geeyay ICRC howshan oo loo sameeyay sababo bani'aadanimo dartood.





HURUMARINTA HELITAANKA DARYEELKA CAAFIMAADKA

- **414,963** bukaan ayaa helay Daryeelka caafimaadka aasaasiga ah iyaga oo ka helay **29** xarun caafimaad oo ka tirsan SRCS.
- **17,938** bukaan ayaa la daryeelay iyada oo la adeegsanayo Barnaamijka Daweynta Bukaan socodka. **16** SRCS xarun caafimaad oo ka tirsan SRCS ayaa lagu taageeraa barnaamijka kaas oo ka caawinaya in bulshada loo soo dhaweeyo adeegyada nafaqeynta. **40,033** caruur ah oo ay da'doodu ka yartahay 5 sano iyo **14,381** oo ah haween uur leh ayaa helay plumpysup, oo ah cunto nafaqo leh, iyo boorash si ay gacan uga geystaan ka hortagga nafaqoxumada.
- **28,421** baaritaano ah ayaa laga sameeyay **4** isbitaal oo ay taageerto ICRC.
- **2,924** caruur ah oo ka yar 5ta sano oo qabay nafaqo xumo aad u daran ayaa isbitaal la seexiyay iyada oo lagu daweyay Xarumaha Dajinta xaaladda bukaannada ee Kismaayo iyo Baydhabo.
- **3,314** bukaan oo laga keenay xarumaha caafimaadka ee SRCS ayaa loo gudbiyay isbitaallo kala duwan si ay u helaan daryeel deg-deg ah ama gaar ah iyada oo lacagta gaadiidkana laga bixiyay.
- **3** ah Xarumaha Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah oo ku yaala Balad Xaawo, Raage Ceelle iyo Berdaale ayaa gabi ahaanba dib loo dhisay.



KA JAWAABIDDA SHUBAN BIYOODKA DARAN

- **1,463,768** qof ayaa ka qeybgalay kulamo caafimaadka kor loogu qaadayo si looga hortago shuban biyoodka daran.
- **19,076** xaalado shuban biyoodka daran ah ayaa la aqoonsaday iyada oo loo gudbiyay xarumo SRCS ka tirsan oo kala duwan oo kuyaala goobahaas si loogu daweyo.
- **388,370** qof ayaa la siiyay agabka nadaafadda sida saabuun, biyo sifeeye, jirgaamo iyo macluumaad ku saabsan ka-hortagga taaso lagula tacaalayo cudurrada ba'an ee biyaha kadasha iyo daacuunka ee ka dillaacay in ka badan **10** goobood oo ku yaalla Soomaaliya.



DHAQAN CELINTA JIRKA

- **7,934** qof ayaa helay adeegyada dhaqan celinta jirka (**3,779** oo Muqdisho ah, **1,482** Hargeysa ah, iyo **2,673** Gaalkacyo ah).
- Marka la isku daro, dhammaan xarumaha dhaqan celinta jirku waxa ay fuliyeen **38,540** kulamo fiiso-tarbiyo ah. Intaa waxaa dheer, **650** qeybaha jirka oo macmal ah, **2,028** qalabka xubnaha jirka kaalmeeya ah, **1,878** qalabka socodka kaalmeeya iyo biraha naafada, **369** kuraasta naafada iyo aaladaha lagu toosiyo qaab-dhismeedka jirka, iyo **84** qalab kale oo kal duwan ayaa la bixiyay.



GARGAARKA DEG-DEGGA AH IYO DARYEELKA ISBITAALKA KA HOR

- **2,058** oo ah bukaano qaba dhaawacyo hub ah ayaa la daweyay, kuwaas oo qaar ka mid ah ay isbitaal u qaadeen kooxaha aambalaasta ee SRCS.
- **825** qof ayaa qaatay Koorsooyinka Tababarka Gargaarka Deg-degga ah ee Bulshada (CFAT).
- **4,458** oo ah ka qeybgaleyaal dheeri ah ayaa xadiray koorsooyin Gargaarka Deg-degga ah oo ay bixisay Bisha Cas (SRCS) arintan oo ka mid ah barnaamijkooda tababarka ee joogtada ah.





GARGAARKA DEG-DEGGA AH IYO SOO CELINTA HAB NOLOLEEDKA

- **56,406** qof ayaa helay markii sadexaad taageero lagaceed arintan oo qeyb ka ah ka jawaab celinteena abaarta sanadka 2022. Intaa waxaa dheer, **258,492** qof oo ay colaadaha iyo fatahaaduhu saameeyeen ayaa lagu caawiyay ugu yaraan hal ilaa **3** wareeg oo taageero lagaceed ah.
- **2,318** beeraley ah oo ku dhaqan jiinka wabiga ayaa la gaarsiiyay deeq lacageed si loogu caawiyo in ay dib u soo celiyaan hab nololeedkooda.
- **887** shaqsi iyo qoysaskooda ayaa helay lacago ay ku shaqeystaan iyo agabka lagu dayactiro kaabayaasha.
- **40** xubnood oo ka tirsan iskaashatooyinka beeraleyda ayaa helay walxo ku saabsan beeraha, oo ay ku jiraan abuurka, bacrimiye, sunta cayayaanka, carro gedis, iyo tababarro ku aadan wax soo saarka abuurka mar walba la beerto.
- **154** oo ah shaqaalaha caafimaadka xoolaha ee bulshada ayaa ka qeyb qaatay korsooyin tababarro xusuusin ah iyaga oo sidoo kalena helay agabka bilowga ah ee caafimaadka xoolaha ama lacago shuruudeysan.
- **1,874** oo ah dumar hogaamiya qoysas ayaa lagu caawiyay lacago loogu talagalay in lagu taageero ganacsiyadooda yar yar.
- **350** ka mid ah dadka shinnida dhaqda ayaa ka faa'iideystay tababar iyo agabka dhaqashada shinnida oo casr ah.
- **1,200** qof oo ka tirsan bulshooyinka nugul oo ay noloshoodu ku tiirsantahay kalluumaysiga ayaa la siiyay tababar dhanka farsama ah iyada oo sidoo kalena la siiyay qalabka lagu kalluumeysto.





FUDUDEYNTA HELITAANKA BIYO NADIIF AH, NADAAFADDA IYO ADEEGYADA KAABAYAASHA CAAFIMAADKA/XABSIYADA

- **410,388** qof ayaa biyo nadiif ah ka helay **52** nidaamyada biyaha ah.
- Shidaal ayaa la siiyay **30** ceel oo ku yaala meelaha ay abaartu ku dhufatay iyada sidaas darteedna la hubiyay in **47,617** qof ay helaan biyo la cabi karo.
- **70,708** qof ayaa helay biyo nadiif ah iyaga oo ka helay nidaamka biyo dhaaminta iyo hagaajin lagu sameeyay meelaha biyaha laga helo sida matoorrada inta ay colaadda Laas Caanood socotay.
- Intii lagu jiray El-Niño, **364,285** qof ayaa ka faa'iideystay ilaalinta **85** oo ah goobaha biyaha laga cabo kuna yaala wabiga jiinkiisa, iyo **153,000** qof oo iyana helay agabka nadaafadda arintan oo ah tallaabo looga hortagayo cudurka daacuunkanka. Waxaa intaa dheer, kooxaha SRCS oo kala jooga **17** xarumood oo ay SRCS leedahay ayaa lagu tababaray isticmaalka diinimada biyaha lagu saaro iyo qeybaha daweynta biyaha. Intii lagu jiray ka jawaabidda, **50** ah agabka biyo saaridda iyo **20** ah qeybaha daweynta biyaha ayaa la sii diyaariyay.
- Howlo dayactir ah ayaa laga fuliyay isbitaallada ay ICRC taageerto : qeybta qaliinka ee isbitaalka Guud ee Kismaayo, qolka dharka lagu dhaqdo iyo qolka meydka ee isbitaalka Kesaneey, musqulaha xarunta dajinta xaaladda bukaanka ee Isbitaal Goboleedka Bay, dayactirka darbiga xeyndaabka u ah Isbitaal Madiina iyo nidaamka biyaha ee xarunta dajinta xaaladda bukaanka ee Oog.
- **40** ka mid ah shaqaalaha ceelasha Wakaaladda Biyaha Puntland (PWDA) ayaa tababar loo sameeyay iyada oo sidoo kalena la siiyay qalab ay howl-maalmeedkooda dayactirka ceelasha ku qabsadaan.
- Hal xabo oo ah sheybaarka biyaha ayaa laga dhisay Garoowe, iyada oo **10** ka mid ah shaqaalaha Wakaaladda Horumarinta Biyaha loo tababaray sidii ay ugu shaqeyn lahaayeen.





U-XISSAB CELINTA DADKA AY DHIBAATADU GAARTAY

- Isugeyn **24,959** farriimo ah oo ka yimid meelo kala duwan ayaa la helay lagana shaqeeyay iyada oo la adeegsanayo lambarka bilaaska ah ee (373).
- **86%** (**21,540**) ka mid ah jawaab celinta ayaa la xiriirtay barnaamijyada sugnaanta dhaqaalaha iyada oo inta ugu badan laga helay Banaadir (**7,082**), Shabeelada Hoose (**5,464**) iyo Shabeellada Dhexe (**2,832**) inta soo hartay oo ah **14%** (**3,416**) jawaab celinta ayaa la xiriirtay barnaamijka Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah (PHC) iyada oo inta ugu badan laga helay Shabeellada Hoose (**1,108**), Shabeellada Dhexe (**541**) iyo Bakool (**465**).
- **66** wicitaano ah ayaa laga helay bulshada ay dhibaataadu Laas Caanood ku gaartay iyaga muujiyay walaaca ay ka qabaan arrimo la xiriira Dhowrida. Kaalmada ugu badan oo ay dadku raadinayeen ayaa aheyd taageerada lacageed iyo mudda la xiriirta hab nololeedka, halka uu sidoo kalena jiray hal codsi oo la xiriiray in qof qoyskiisii ay kala lumeen dib loola mideeyo.



ICRC Somalia Delegation
Ngecha Road off Lower Kabete Road
P.O.Box 73226-00200 Nairobi-Kenya T + 254 0709 132 000
SOK-Nairobi@icrc.org

ICRC offices in Mogadishu, Kismayo, Garowe, Baidoa, Jowhar,
Dhusamareeb and Hargeisa.

www.icrc.org
All photos: ICRC
© ICRC, February 2024



ICRC

 facebook.com/ICRCAfrica

 twitter.com/ICRC_Africa

 https://www.instagram.com/icrc_somalia/

 blogs.icrc.org/Somalia